WARBIXIN-SHAQSIYEEDYADA LA URUURSHAY SIDEE BAA LOOLA DHAQMI DOONAA?

Mashruucaan awgiis waxaan ururin doonaa oona diiwan gelin doonaa warbixin ku saabsan hooyada iyo ubadkeeda. Warbixin-shaqsiyeedka ku saabsan hooyada waa da´deeda, miisankeeda iyo dhirirkeeda; tirada uurqaadii berri hore, warbixin-shaqsiyeedka xiriir la leh uurqaadida iyo ummulida iyo waxa cunugga ku dhacay, xogtaas oo idil waxaa lagu qori doonaa qoraalka ummulida iyo xaaladaha qaarkood xitaa xasuus-qorka daryeel-caafimaadeedka ee xilliga noolasha dhallanka ee ugu horeeyso. Jawaabta aan idinka helno iyo natiijada waxaa loola dhaqmi doonaa qaab usan qof shaqo ku lahayn aqrisan karin. Xogta la ururshay waxaa loo yeeli doonaa kood, waxaana hawlo ka qaban doono oo keliya cilmibaareyaasha arrinta ay khuseeyso. Waxaa dhici karto in baareyaasha tayada ee madaxbanaan, ay aqristaan qaar warbixin-shaqsiyeedyada kamid ah. Fureha koodka waxaa lagu kaydin doonaa goob sugan, waxaana gacanta u dhigi karo oo keliya kooxda cilmibaareyaasha. Warbixin-shaqsiyeedka waxay hoos timada Xeerka arrimaha guud iyo xajinta sirta xirfadda [Offentlighets- och Sekretesslagen (2009:400)].

Ulajeedada warbixin-shaqsiyeedka laga leeyahay ayaa waxay tahay cilmibaarista. Tan kale asaaska sharciyada waa oggolaanshada ka qaybgelida cilmi-baarista. Warbixin-shaqsiyeedka hooyada waxaa xilliga kaydinta kaddib, la kaydin doonaa muddo tobban sannadood ka kooban, taasoo waafaqsan Xeerka arkifiyada (1990:782) iyo nidaamka u degsan qaabka loo daryeelo warbixinada iyo arkiifiyada ee Maamulka Gobolka Skåne.

Mas`uulka warbixin-shaqsiyeedka waa maamulka Gobolka Skåne. Sida hadba waafaqsan Hab-maamuleedka sugidda warbixin-shaqsiyeedka ee Midowga Yurub [EU:s dataskyddsförordning] waxaa xaq ku leedahay in lacag la`aan ku aqrisato warbixin-shaqsiyeedka idinku saabsan, kaasoo xiriirka la leh cilmibaarista, iyo awoodda saxida haddii warbixin khalad ah aad ka heshaan. Waxaad kaloo codsan kartaan in warbixin-shaqsiyeedka idinku saabsan la ciribtiro iyo in xad loo yeelo isticmaalka warbixin-shaqsiyeedka idin khuseeyo.

Haddii aad doonaysaan inaad aqrisataan warbixin-shaqsiyeedka idinku saabsan, la xiriira mas´uulka mashruuca cilmibaarista, kaasoo ah cilmibaare Ola Andersson (eeg faahfaahinta xiriirka hoos ku qoran).

Adreeska Wakiilka arrimaha amniga xogta kombyuutarrada ku qoran waa ”Dataskyddsombudet, Region Skåne, 281 89 Kristianstad”. Haddii aadan ku qanacsanayn qaabka warbixin-shaqsiyeedkiinna loola dhaqmay, waxaad xaq ku leedihiin in caabasho u qortaan Hay`adda arrimaha xogta kombyuutarrada ku qoran [Datainspektionen] oo ah hay`adda kormeerta.

QOF KA HAWLGALA ISBITAALKA [SKÅNES UNIVERSITETSSJUKHUS, MALMÖ] AYAA LA XIRIIRI KARTAAN HADDII WARBIXIN DHEERAAD AH AAD U BAAHAN TIHIIN:

Ola Andersson
(mas`uulka cilmibaarista [SAVE-studien])
Dhakhtar sare, Waaxda xilliga noolasha dhallanka ugu horeeyo
040-33 10 53, ola.andersson@skane.se

Li Thies-Lagergren
(mas`uul ummuliso [SAVE])
Macallin, jaamacadda [Lunds Universitet]
070-23 84 761, li.thies-lagergren@med.lu.se

Elin Åberg
Ummuliso
Waaxda ummulida
0771-111 888

Gisela Rickle
(mas`uul dhakhtar dumarka [SAVE-studien])
Dhakhtar sare, Waaxda ummulida
040-33 28 96

Pernilla Lundgren
Ummuliso, iskuduweha cilmibaarista
Waaxda ummulida
0771-111 888

Malin Liljenberg
Ummuliso
Waaxda ummulida
0771-111 888

Version 191022

SAVE-studien

BAAHIDA HAWO-SIINTA IYO DIB U DHIGIDDA JARIDA XARIGA XUDUNTA

Warbixin waalidiinta loogu talagalay

Warbixin loogu talagalay dadka cilmi-baarista khuseeyso

Waxaan ku waydinaynaa haddii aad raali ka tahay in adiga iyo dhallankaaga aad ka qayb geli kartaan mashruuca cilmi-baarista. Qoraalkaan waxaa ku qoran warbixin xiriir la leh mashruuca iyo macnaha ay ku leedahay ka qaybgelideeda.

WAA MAXAY MASHRUUCA MAXAYNA TAHAY SABABTA AAD U DOONAYSAAN IN ANIGA IYO DHALLANKAYGA AAN UGU QAYB GALNO?

Tirokoob lagu qiyaasay 10-kii cunug ba ee dalka Iswiidan ku nool, wuxuu u baahan yahay nooc waxkaqabad ah, kaasoo kaddib markii laga soo saaro waaxda ummulida, uu suurtagelin doonto in uu si caadi ah u neefsado. Waxaa dhici karto in xaaladaha badidooda in wareegga dhigga ee mandheerta ama xariga xudunta, u muddo gaaban ama dheer saamayn ku yeeshay ilmaha. Haddii markii cunugga u dhasho usan u neefsan karin hab ku filan, ama usan gebi ahaan muujinayn in u nool yahay, waxaa durbadiiba laga jara xariga xudunta kaddib la geya goob, halkaas ayaa lagu siiyaa neefsasho macmal ah /hawo-siin, laguna siiyaa daryeelo kale oo ugu soo kabsado dhibka jira. Tani waxaa loo yaqaanna badbaadinta sambabaha iyo wadnaha ee xilliga noolasha dhallanka ee ugu horeeyo.

Ilmaha korniinkooda aan qabyo ahayn oona caafimaadkooda wanaagsan yahay, waxaa badidooda caadi ahaan dalka Iswiidan laga jara xariga xudunta 30 ilbiririqsi gudahooda ummulida kaddib. Nidaamka waaxyadaha ummulida sidaas ayuu ahaa ilaa 2008-kii. Cilmibaaris badan ee la sameeyay, waxaa lagu xaqiijiyay in haddii muddo ka kooban 3-5 daqiiqo dib loo dhigo jarida xariga xudunta, ay suurtagal noqon karto in dhiig badan uu ku jiray mandhaayrta loo gudbin karo cunugga dhallanka ah. Haddii sidaas la sameeyo waxaa aad ugu faa´iidaysan doono caafimaadka cunugga, sida hoos u dhigida cillada dhigga iyo macdanta, iyo helida horumar aan wax cillad lahayn.

Ilmaha oo xilliga noolasha ee ugu horeeyso u baahnaa badbaadinta sambabaha iyo wadnaha, kama qaybgelin cilmibaarista kor ku xusan. Waxaa dhici karto in taasi ay u sabab ahayd, in dhigga ku haray mandheerta u hodan ku ahaa oksijin iyo nafaqo. Waxaa jirto fursad in ilmaha ku dhasha cillada neefsashada, ay talaabadaan ka faa`iidaysan karaan oo ay ku heli karaan oksijin, waa haddii dhawr daqiiqadood oo dheeraad ah dib loo dhigo jarida xariga xudunta.
Tani waxaa lagu shaacbixiyay oo keliya cilmibaaris hordhac ahayd.
Waxaan doonaynaa in aan baarno waxa dhici doono, haddii xilliga badbaadinta sambabaha iyo wadnaha ee dhallanka aan ugu yaraan 3 daqiiqo dib u dhigno jarida xariga xudunta. Taasoo la barbardhigo sida imminka loo dhaqmo oo ah jarida xariga xudunta, kahor inta aan la bilaabin badbaadinta sambabaha iyo wadnaha ee dhallanka. Waxaan su`aashaas waydin doonaa dadyoowga waalidiin noqon doono, kuwaasoo tiradooda gaarayso 8000. Tirada ilmaha u baahan doono badbaadinta sambabaha iyo wadnaha, waxaa lagu qiyaasay 600.

SIDEE BA CILMIBAARISTA LOOGU DHAQAAQA?

Qaddar yar kahor inta aadan ummulin, waxaa loo sheedinayaa kahor inta aan xariga xudunta la jarin, badbaadinta sambabaha iyo wadnaha waa haddii loo baahdo isagoo ku sugan agagaarka hooyadiisa. Ama waxaa dhici karto in xariga xudunta durbadiiba laga jaro, kaddib lagu dhaqaaqo badbaadinta sambabaha iyo wadnaha isagoo saaran miis u dhow.

Qalabyada iyo shaqaalaha fulin doono hawlaha badbaadinta sambabaha iyo wadnaha waa isla iyada/iyaga. Waxa keliya ee ay ku kala duwan yihiin waxaa weeyaan, jarida wareegga dhigga ee xariga xudunta iyo halka lagu sameeyn doono badbaadinta sambabaha iyo wadnaha. Ilmihii u baahna badbaadinta sambabaha iyo wadnaha waxaa lagu daryeeli doonaa waaxda ummulida /waaxda dhallanka ama waaxda xilliga noolasha dhallanka ugu horeeyo, waa hadba baahida jirta. Markii uu ku sugan yahay waaxda ummulida /waaxda dhallanka waxaa la kormeera xaalad caafimaadeedka guud ee dhallanka iyo heerka sonkorta dhiigga sida hadba waafaqsan nidaamku. Ilmaha u baahan kormeerid dheeraad ah iyo baaritaan caafimaad oo dheeraad ah waxaa lagu daryeela waaxda xilliga noolasha dhallanka ugu horeeyo.

SIDEE BAA CILMIBAARISTA LOO HIRGELIYAA (SII WADIDA)?

Marka laga reebo xilliga daryeelida ka sokoow, waxaan dhallanka markii da`diisa ay u dhaxayso hal ilaa lex saacadood fiirogaar siin doonaa qaabka dhallanka u neefsanayo, iyadoo haddana aan fiirogaar siin halka lagu daryeelayo sida waaxda ummulida, waaxda dhallanka ama waaxda xilliga noolasha dhallanka ugu horeeyo.

Ilmaha u baahan daryeelida ku salaysan badbaadinta sambabaha iyo wadnaha ee xilliga noolasha dhallanka ee ugu horeeyo, oona cilmi-baarista ka tirsan, waxaa la tixraaci doonaa xaaladooda iyadoo la adeegsanayo foom su`aallo ku saabsan horumarka cunugga ku qoran, kaasoo muddo hal sano ah waalidiinta ay buuxin doonaan. Tani waa nidaamka ka sokoow tixraacid dheeraad ah.

Ilmaha oo xilligii daryeelida oo u ku sugna waaxda ummulida, oo u muujiyay cillad laga shakiyay oo xiriir la leh cillada oksjinka, waxaa sida hadba waafaqsan hab-raac joogto ah, xaaladiisa la tixraaci doonaa markii uu 2 sano iyo 5.5 sano buuxsado. Natiijada cilmibaarista waxaan ku biirin doonaa cilmi-baarista-SAVE.

DHIBAATOOYINKA AY KA QAYBGELIDA CILMI-BAARISTA LAHAAN KARTO

Ku dhaqaaqida daryeelida ku salaysan badbaadinta sambabaha iyo wadnaha dhallanka aan weli laga goyin xariga xundhurta, kaasoo lagu sameeyo agagaarka hooyada waa hawlgal shaqaalaha caafimaadka ku cusub. Sidaas awgeed, cilmibaaristaan kahor waxaa dhammaan shaqaalaha caafimaadka la siin doonaa tababar. Dhallanka lagu bilaabo daryeelida ku salaysan badbaadinta sambabaha iyo wadnaha ka hor inta aan xariga xundhurta laga jarin, wuxuu mandheerta ka heli karaa dhig dheeraad ah. Dhigga dheeraadka ah wuxuu sababi doonaa in hab dhaqsi ah u dib ugu soo bogsado, waxaana sare u kacayo tirade dhiigga cas, taasoo iyadana ka hortagayso cillada macdanta birta, laakin waxaa dhici karto in sare u kacdo halista joonis/cagaarshow. Awooda neefsashada hab fiican ayaa saamayn loogu yeelan karaa, sida oksijin helida fiican, ama ka xun, sida neefsasho dhaqsi badan oona dhib badan.

Ilmaha xilliga noolashooda ugu horeeyso u baahan daryeelida ku salaysan badbaadinta sambabaha iyo wadnaha, oona qabay cillada oksijinka, waxaa dhici karto in jirkooda u dhaawac gaaro, sida tusaale dhaawaca maskaxda, wadnaha ama kiliyaha. Ka qaybgelida cilmi-baarista waxay suurtagelin doontaa, in la tixraaci doono xaaladda cunugga oona la kormeeri doono korniinkiisa markii uu hal sano buuxsado. Cunugga cilmi-baarista darteed, looma geysan doono wax xannuun ama dhibsasho ah.

KA QAYBGELIDA CILMI-BAARISTA WAA IKHTIYAARI

Ka qaybgelida cilmi-baarista waa ikhtiyaari, waxaana suurtagal ah inaad joojisaan ka qaybgelida mar alle markii aad doontaan. Haddii aad go`aansataan inaad joojisaan ka qaybgelida uma baahnidin inaad sheegtaan sababta, tan kale wax saamayn ah kuma yeelan doonto daryeelida ama daawaynta hooyada ama cunugga.
Haddii aad doonaysaan inaad joojisaan ka qaybgelida ubadkiinna, waa inaad xiriir la yeelataan mas`uulka cilmi-baarista (eeg dusha qoraal warbixineedkaan). Cilmi-baarista mashruuca waxaa mas`uul ka ah maamulka Gobolka Skåne. Madaxa cilmibaarista, taasoo loola jeeda ururka mas`uul ka ah cilmi-baarista. Isla caymiska bukaansocodyada ay ku leeyihiin xarumaha daryeel-caafimaadeedka, ayaa ka hirgalayo ama khuseeya ilmaha ka qaybgalo cilmi-baarista.

SIDEE AYAA LAGU HELA WARBIXIN XIRIIR LA LEH NATIIJADA CILMIBAARISTA?

Haddii aan haysanno emailka waalidiinta waxaan warbixinta natiijada ugu soo hagaajin doonaa emailkooda. Natiijada waxaa kaloo lagu soo bandhigi doonaa barta internetka, baraha bulshada, shirarka cilmibaaryeaasha, wargeysyada cilmiga iyo lagu faafin doonaa warbaahinta. Natiijo cunug u gaar ah marna lama faafi doono mana laga garan doono natiijada.